**XUKUUMADDA SOMAALIYA**

**XEER 2da Jannaayo 1957. N. 8 rep.**

## Nadaamka Asaasiga ee Machadka Sare ee Qanuunka iyo Dhaqaalaha ee hoos taga Hey'adda Qanuunka Guud

Maamuluhu

Marki uu arkay qaanuunka 24 maajo 1956, n. 2 oo dhigaya in la asaaso Machad Sare ee takhasusyada Qanuunka, Dhaqaalaha iyo Bulshada oo ka mid noqonaya Qaanuunka Guud, iyo in la raaciyo Dugsiga Siyaasadda iyo maamulka;

Marki uu tixgeliyey baahida loo qabo in la asaaso qanuunka Machadka Sare;

Marki uu arkay soo jeedinta wasiirka koowaad;

Marki uu dhegeystay Golaha Wasiirada;

WUXUU XEEREEYAY:

**Qod. 1**

Waxa la oggolaaday xeerka asaasiga ah ee ku lifaaqan Hay'adaha qaanuunka guud "Machadka Sare ee Qanuunka, Dhaqaalaha iyo bulshada" kaas oo qaadanaya magaca "Machadka Sare ee Sharciga iyo Dhaqaalaha".

**Qod. 2**

Waa la tirtiray Dhamaan sharciyadii hore ee ka soo horjeeda nadaamkan asaasiga ah ee mideysan.

MAAREEYE

**P. Franca**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Arkay n. 12 ee 31 jannayo 1957.

Maamulaha Xisaabaadka **Tura**

ARKAY Diiwaangelinta Buug n. 1, warqad n. 48

Muqdisho, ee 30 Jannayo 1957.

Garsooraha xisaabaadka: **Spadaro**

## QAANUUNKA ASAASIGA EE HE'YADDA

### CINWAANKA 1AAD

Ujeeddooyinka, hey'ado, maamulid

**Qod. 1**

Hay'adda "Machadka Sare ee Sharciga iyo Dhaqaalaha" lagu asaasay sharciga 24 maajo 1956, n. 2, waa Hay'ad Sharciga Dadweynaha ah oo leh shaqsiyad sharciyeed u gaar ah.

**Qod. 2**

Hay'adda waxa ay ka kooban tahay: a) Machadka Sare ee Sharciga iyo Dhaqaalaha (oo hadda iyo wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono "Machad") kaas oo bixidoona dibloomooyinka sharciga iyo dhaqaalaha; b) dugsiga diyaarinta siyaasada-maamulka (kaas oo

hadda iyo wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono "Dugsi") kaas oo bixidoona dibloomada takhasuska ah ee fulinta wax qabadyada la xiriira howlaha guud ee dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

**Qod. 3**

Hey’adda qaybaheedu waa:

I. - maareynta maamulka:
   a) - madaxweynaha;
   b) - golaha maamulka:
   c) - agaasimaha Maamulka;
   d) - gudiga hanti dhowrka;
   e) - xafiiska xoghaynta iyo dhaqaalaha.

II. - howlaha waxbarista:
   a) - hormuudka iyo gudiga barayaasha sare ee machadka;
   b) - hormuudka iyo guddiga barayaasha sare ee dugsiga.

**Qod. 4**

Madaxa Hey’adda waxaa magacaaba Maareeyaha, kadib soo jeedinta Wasiirka Arimaha Bulshada muddo xileed labo sano ah; waxa uu leeyahay wakiilnimo sharci ee Hey’adda; wuxuu amrayaa kharashaadka ku xaddidan miisaaniyadda isla markaana wuxuu hubiyaa dhammaan howlaha maamulka caadiga ah ee aan si gaar ah loogu xajinin Golaha Hey’adda, iyadoo la raacayo Sharcigan iyo qodobada kale ee hadda jira; waxay kulmayaan ugu yaraan laba jeer sanadkii waxa uuna shirguddomiyaa golaha mamulka; waxa uu kormeeraa habsami u socodka howlaha Hey’adda waxa uuna mas'uul u yahay nadaamka Maareeyaha.

Haddii uu maqnaado ama carqalad ku timaado, howlaha madaxa waxaa qabta maamule uu isaga u xilsaaro bilowga howlgalkiisa.

**Qod. 5**

Golaha maamulka waxa ay ka kooban yihiin Madaxa Hey’adda, agaasimaha Maamulka, laba xubnood oo uu magacaabo Wasiirka Arimaha Bulshada, hormuudka Machadka, maamulaha Dugsiga, iyo sidoo kale laba xubnood oo kale oo mid walbaa u magacaabay golaha barayaasha sare ee Machadka iyo golaha barayaasha sare ee Dugsiga iyaga ka dhex dooranaya xubnahooda. Xubnaha ay magacaabaan Wasiirka Arimaha Bulshada iyo golayaasha barayaasha sare waxa ay xilka hayaan labo sano.

**Qod. 6**

Golaha Agaasimayaashu waxa ay ansaxiyaan miisaaniyad sanadeedka, si loogu soo bandhigo Wasiirka Arimaha Bulshada iyadoo laga codsanayo in ay wax ku biiriso dowladdu haddii loo baahdo; wuxuu ansaxiyaa xisaab sannadeedka kama dambaysta ah; waxa uu ka baaraandegaa waxyaabaha dheeriga ah ee maamulka aan caadiga ahayn; wuxuu oggolaanayaa kharashyada aan caadiga ahayn ee aan horay loogu sii darin miisaaniyadda, isaga oo u oggolaanaya Madaxa in uu u soo bandhigo Wasiirka Arrimaha Bulshada codsi ku saabsan lacagaha lagama maarmaanka ah; waxa uu xaddidaa qadarka wajibaadka cilmiga iyo tabaruca kale ee suurtagalka ah ee ka qaybgalka dowrooyinka; waxa uu leeyahay xil u dhiibid ama kala noqosho, kadib soo jeedinta goleyaasha kala duwan ee barayaasha sare, deeqaha waxbarasho iyo abaalmarinada loogu qalmo ardayda Machadka iyo Dugsiga oo go'aamiya si la mid ah wadarta

guud ama qayb ka ah bixinta waajib dugsiyeedka; waxa uu shaqaaleeyaa ama ceyriyaa shaqaalha guud ama shaqaalaha khidmada ee hey’adda, isaga oo meel saara la macaamilkooda sida uu qabo sharciga hadda jira ee shaqaalaha la midka ah ee maamulka; si la mida, waxaa uu bixiyaa ogolaanshaha fasaxa aan caadiga ahayn, kadib soo jeedinta agaasimaha Maamulka, waxa uu qaadaa talaabooyinka edbinta ee lagama maarmaanka ah.

Kulamadu waxay ay ansax ku yihiin marka ay ka qabgalaan ugu yaraan shan xubnood oo ka mid ah Guddiga, oo ay ku jiraan gudoomiyaha ama wakiilkiisa iyo Agaasimaha Maamulka, go'aamadana waxaa si aqlabiyad leh ku ogolaada xubnaha jooga. Haddii ay codadku sinmaan, codka gudoomiyaha ayaa hortebin yeelan.

Daqiiqadaha shirka guddiga ayaa waxa saxiixa dhammaan xubnaha ka qeybgala shirka golaha.

**Qod. 7**

Agaasimaha Maamulka waxaa magacaaba Guddiga Agaasimayaasha muddo 4 sano ah; wuxuu fuliyaa qodobbada Madaxweynaha iyo go'aannada Guddiga Agaasimayaasha, wuxuuna guud ahaan kormeeraa, isaga oo raacaya talooyinka Madaxweynaha oo u hoggaansamaya qawaaniinta hadda jirta, maamulka hay'adda; wuxuu kormeeraa shaqaalaha maamulka iyo adeegga wuxuuna u soo jeediyaa Madaxweynaha talooyinka la xiriira marka laga yimaado kartida Guddiga Agaasimayaasha iyadoo la raacayo qod. 6 ee Sharciga jira.

Haddii ay dhacdo maqnaansho ama carqalad, shaqadiisa waxaa qabta xubin ka mid ah Guddiga Agaasinka ama sarkaal kale ee Hey’adda oo u magacaaba Madaxweynahu.

**Qod. 8**

Golaha Hanti-dhowrka wuxuu ka kooban yahay saddex xubnood oo joogto ah iyo laba xubnood oo la kala beddelo lana magacaabo. Mid ka mid ah xubnaha wax ku oolka ah ayaa noqda Garsooraha xisaabaadka waana Madaxa Golaha. Wasiirka Arimaha Bulshada iyo Wasiirka Arimaha Dhaqaalaha mid walbaa waxa uu soo doortaa hal xubin oo joogto ah iyo hal xubin kale oo la beddelo lagana soo xulay dadka ka baxsan Hey’adda.

Xubnaha joogtada ah iyo kuwa beddelka ah waxay sii hayaan xafiiska muddo afar sano ah waana loo cusbooneysiin karaa.

**Qod. 9**

Golaha hanti dhowrka waa in ay soo gudbiyaan xisaabaadka ugu dambeeya ee Hey’adda sanad walba sedex bilood gudahood dhamaadka sanad waxbarasho.

Ku dhawaaqida guddiga ee xisaabaadka koontada lafteeda waa in lagula socodsiiyo nuqul Wasiirka Arimaha Bulshada, oo wata xisaabta ugu dambeysa.

Waa in sidoo kale loo diraa Golaha Hanti-dhowrka ka hor dhammaadka casharrada sannad-dugsiyeed kasta, miisaaniyadda sannadka-daraasadeedka xiga iyo codsi kasta oo ku saabsan hibada dowladda.

Guddiga Hanti-dhowrka wuxuu xaq u leeyahay inuu hubiyo Maamulka iyo maareynta Hey’adda wakhti kasta.

**Qod. 10**

Xoghaynta iyo Xafiiska dhaqaale-deraska waxa ay ku fuliyaan shaqooyinkooda iyaga oo hoos imaanaya jiheynta iyo kormeerka Madaxa iyo Agaasimaha Maamulka.

**Qod. 11**

Hantida Hay'ada iyo dakhligeedu waxay ka kooban yihiin:

a) - lacagaha waxbarashada iyo khidmadaha;
b) - hibaadka dowladda;
c) - tabaruc, dhaxal, hibo nooc kastoo ah, iyo wixii tabarucaad ah oo ay ka hesho Hay'addu shaqsiyaad gaara ama hay'adaha kale.

**CINWAANKA 2AAD**

Machadka sare ee sharciga iyo dhaqaalaha

**Qod. 12**

Dowrooyinka laba sano ah ee lagu baranayo Machadka waxaa ku jira barida maaddooyinka sannadlaha ah ee soo socda:

a) - Horudhaca cilmiga garsoorka iyo Hey'adaha sharciga ee bulshada;
b) - Hay'adaha sharciga gaarka loo leeyahay;
c) - Hay'adaha sharciga maamulka;
d) - Sharciga dembiyada;
e) - Nadaamka dastuurka iyo maamulka ee Soomaaliya;
f) - Sharciga Islaamka;
g) - Sharciga garsoorka;
h) - Sharciga caalamiga ah;
i) - Sharciga shaqada iyo bulshada;
l) - Dhaqaalaha Siyaasadda;
m) - Siyaasad dhaqaale iyo maalgelinta;
n) - Cilmiga maalgelinta;
o) - Tirakoobka;
p) - Taariikhda caqiidooyinka siyaasadeed;
q) - Juqraafiga siyaasadda iyo dhaqaalaha;

Dowrooyinka soo socda waxaa loo tixgeliyaa diyaarin: hordhaca cilmiga garsoorka iyo machadyada sharciga bulshada, Hay'adaha sharciga gaarka loo leeyahay, Hay'adaha sharciga maamulka, dhaqaalaha siyaasadda, Taariikhda caqiidada siyaasadeed.

**Qod. 13**

Dowrooyinka soo socda ee buuxinta ikhtiyaariga ah ayaa sidoo kale la bari karaa: Carabi, Faransiis, Ingiriis, suugaan Talyaani, Taariikhda dhaqanka Talyaaniga iyo farshaxanka.

Muddada iyo qaabka ay dowrsooyinka u kala dhiganayaan waxaa dhisi doona Guddiga Agaasimayaasha iyada oo ay la ogyihiin Golaha bareyaasha sare.

**Qod. 14**

Wax ka badalista ama ku darista liiska maaddooyinka aan ka ahayn waxbarida diyaarinta, iyo sidoo kale wixii kordhin ah ee dowradaha waxaa lagu ansaxin karaa Golaha Agaasimayaasha iyo golaha bareyaasha sare.

**Qod. 15**

Madaxa machadka waxa uu xaq u leeyahay in uu bixiyo dowrado bilaash ah ama uu amro shirarka hal ama kooxo, ee ku saabsan arrimaha la xiriira qorshaha waxbarashada iyo ujeeddooyinka Machadka taas oo ku xiran oggolaanshaha Guddiga Agaasimayaasha si loo helo wixii qarashaad ah.

**Qod. 16**

Dowrooyinka takhasuska ah ee hal maaddo ama ka badan ee isla xiriira looguna talagalay kuwa ka qalin-jabiyay Machadka ama keensada shahaadooyin kale oo tacliin sare, waxaa dejin kara madaxa Machadka kadib markii ay ansixiyaan guddiga agaasimayaasha si loo helo wixii qarashaad ah ee la xiriiri kara.

**Qod. 17**

Musharixiinta leh diblooma dugsiga dhexe-sare ama diblooma ka soo baxday dugsiga diyaarinta ee siyaasadda, maamulka ama shahaadooyin kale oo u dhigma, oo ay tahay in ay qiimeeyaan Golaha barayaasha sare, ayaa lagu qori karaa Machadka iyada oo aan la imtixaanin. Murashixiinta la yimaada diboloomada machadka sare ama shahaadooyin kale oo u dhigma oo ay tahay in ay qiimeyn ku sameynayaan Golaha barayaasha sare ayaa lagu qori karaa Machadka kadib imtixaan dhamaystiran. Qaababka imtixaannada loo qaadayo waxaa dejiyo Golaha barayaasha sare.

**Qod. 18**

Wax baridda waxaa bara macalimiinta sare ee mas'uulka ka ah heerkooda garsoorka. La macaamilka iyo habka magacaabista waxaa dejiya qawaaniin gaar ah, oo ay ka tashanayaan Guddiga maamulka.

**Qod. 19**

Golaha barayaasha sare ayaa ka kooban macallimiin waxaana guddoomiye u ah Madaxa Machadka. Waxa uu leeyahay hawsha habeynta wax barista ee Machadka. Gaar ahaan, bilowga sanad dugsiyeed kasta, Golaha barayaasha sare ayaa isku dubbarida barnaamijyada barista ee ay soo bandhigaan shaqsiyaadka macallimiinta ah. Guddigu waxay kaloo ka baaraandegaan tallaabooyinka edbinta ee ardayda ka dhanka ah. Golaha barayaasha sare waxaa in la shiro isugu yeera madaxa Machadka ama codsashada saddex meelood meel barayaasha sare.

**Qod. 20**

Madaxa Machadka waxaa Golaha barayaasha sare ka dhex doortaan mid kamida macallimiinta sare, waxa uu leeyahay muddo xileed labo sano ah oo loo cusbooneysiin karo.Waxa uu mas'uul ka yahay kormeerka, iyo habsami u socodka waxbarashada Machadka.

Haddii ay dhacdo maqnaansho ama carqalad, Madaxa waxaa lagu beddelaa bare sare oo kale oo uu u wakiishay.

**Qod. 21**

Laba kal-fadhiyo imtixaan ayaa loo qabtaa sannad kasta dhammaan maadooyinka baridda, kan ugu horreeya isla marka la dhammaystiro casharada, kan labaadna ka dib dhammaadka xilliga fasaxa sannadlaha ah.

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay imtixaan afka ah maado kasta. Imtixaanada waxa qaada gudi sedex xubnood ka kooban oo uu magacaabayo maamulaha, oo midkood uu noqon karo kaaliye.

Imtixaan kasta waxaa lagu saxaa soddon dhibcood; xubin walba ee gudiga wuxuu leeyahay toban dhibcood. Ugu yaraan 18 dhibcood min soddon ayaa loo baahan yahay si ardaygu u gudbo.

Maadooyinka aysan ku guuleysan in ay gudbaan, ardayda waxaa loo oggol yahay in ay ku celiyaan imtixaanka kal-fadhiyada xiga.

**Qod. 22**

Machadka waxaa uu bixiyaa dibloomada sharciga iyo dhaqaalaha. Si loo helo dibloomada, murashax kastaa waa inuu ku gudbaa imtixaannada maadooyinka diyaarinta iyo ugu yaraan toddobo maado oo barid ah oo laga soo xushay qodobka 12, waa inuu markaa ku sameeyaa imtixaan qoraal ah oo kama dambeys ah oo ku saabsan mowduuc ka mid ah maaddooyinka uu ku gudbay imtixaannada. Qaababka imtixaanadaas waxaa dejiya Golaha barayaasha sare, imtixaanka qoraalka ah ayaa imaanayo kadib dood afka ah oo dhexmarta ardayga iyo guddiga dibloomada oo ka kooban madaxa Machadka ama qof uu wakiisho iyo 4 xubnood oo uu madaxa Machadku magacaabo.

Guddiga Dibloomada waxay ku muujiyaan qiimeyntooda wadajirka ah dhibco kontonley ah, iyaga oo tixgalinayo sidoo kale natiijooyinka imtixaanaadka ee maaddo kasta oo baxda ee manhajka oo ay ku jiraan kuwa ikhtiyaariga ah.

Xubin kasta oo ka mid ah guddiga wuxuu leeyahay toban dhibcood.

Ugu yaraan 30 dhicood min konton ayaa loo baahan yahay si loo helo Dibloomada.

**Qod. 23**

Ardayda aan dhamaadka labada sano ee dowrada waxbarasho ku gudbin dhammaan imtixaannada way sii wadan karaan in ay ku qornaadaan Machadka ayaga oo dibadda ka ah heerka fasalka ilaa ay ka gudbaan dhammaan imtixaannada, waana ka dhacaa xaqa ardaga ku qoran fsalka dibaddiisa helitaanka Dibloomada haddii dhammaadka laba sano isku xiga ee dowrada imtixaanadeeda uu waxna ku gudbi waayo.

**Qod. 24**

Baahida waxbaridda ee Machadka kadib soo jeedinta mid mid macallimiinta, Golaha barayaasha sare waxa ay xaq u leeyihiin in ay magacaabaan shaqaale mushaarle ah muddo sannad ah lana gaarsiin karo ilaa afar sano, sidoo kale kaaliyeyaal isxilqaan khidmo la siiyo, tan oo ku xiran ogolaashaha maamulka si loo meel dhigo kharashaadka la xiriira ee loo baahan karo.

**Qod. 25**

Sannad-waxbarasheedku waxa uu billowdaa 1da agoosto waxa uuna dhammaadaa 31ka luuliyo sannadka xiga.

**CINWAANKA 3AAD**

Dugsiga diyaarinta siyaasadda maamulka

**Qod. 26**

Dowradda waxbarasho ee Dugsiga waxa ay socotaa saddex sano maadooyinka laga dhigo waa kuwa soo socda:

a) Qyabaha qaanuunka guud;
b) Qaybaha qaanuunka gaarka ah;
c) Qaybaha qaanuunka dembiyada;
d) Hey’adaha Islaamka;
e) Qaybaha sharciga caalamiga ah iyo nidaamka Qaramada Midoobay;
f) Qaybaha dhaqaalaha siyaasadeed iyo cilmiga maaliyadeed;
g) Qaybaha xisaabaadka guud iyo xisaabinta maamulka;
h) Qaybaha tirakoobka la dabaqay;
i) Xisaabaadka Ganacsiga;
j) Ku dhaqanka maamulka;
k) Taariikhda iyo juqoraafiga;
l) Xisaabaadka;
m) Fiisiko iyo kiimiko;
n) Barashada cilmiga dabiicadda.

**Qod. 27**

Musharixiinta keensada shahaadada dugsiga hoose/dhexe ama aqoonsi kale oo u dhigma oo ay qiimeyn ku sameynayaan Golaha barayaasha sare ayaa loo ogolaadaa dugsiga imtixaan l’aan.

Intaas waxa u sii dheeri ah, kuwa u qalma gelitaanka imtixaan u qalmida ka hor bilowga casharrada sanad dugsiyeed kasta waxaa lagu qori karaa Dugsiga, imtixaanka u-qalmitaanka wuxuu ka kooban yahay qoraal af talyaani ama Carabi ah, sida uu doorto musharax kasta, ee mowduuca ku saabsan dhaqanka guud iyo wareysi u dhexeeya musharraxa iyo baarayaasha kuna saabsan maaddooyinka barashada dugsiga hoose/dhexe, guddiga imtixaanka wuxuu ka kooban yahay macallimiinta dugsiga oo uu guddoomiye u yahay maamulaha dugsiga ama wakiilkiisa.

Da'da ugu yar ee gelitaanka dugsiga waa 18 sano.

**Qod. 28**

Intaas waxaa u sii dheeri ah, shaqaalaha dowladda ee ka codsada ogolaansho wanaagsan madaxda maamulayaashood waxaa lagu qori karaa Dugsiga si ay u xaadiraan cashar edbin ama kooxo casharo edbineed la mid ah.

Kuwa sida sharciga ah u raacay dowrooyinka kore waxay ka heli doonaan maamulaha shahaadda ka qaybgalka. Waxay kaloo awood u yeelan doonaan in ay galaan imtixaanno isla maaddooyinka ay codsadaan, iyagoo helidoona shahaaddo markhaati fur natiijooyinka ay gaareen.

**Qod. 29**

Magacaabista macallimiinta iyo la macaamilkooda waxaa nidaaminaya qawaaniin u gaar ah oo ay ansixiyaan Guddiga Maamulayaasha.

**Qod. 30**

Golaha barayaasha sare ayaa ka kooban macallimiinta Dugsiga waxaana shirgudoomiyaa maamulaha, howshoodu waa habeynta waxbarashada Dugsiga. Gaar ahaan, bilowga sanad dugsiyeed kasta, Guddigu wuxuu isku dubarida barnaamijyada barista ee ay soo bandhigaan macallimiintu mid mid ahaan. Iyaga ayaana ka baaraandega tallabooyinka edbinta ardayda.

Guddiga barayaasha sare shirkooda waxaa isugu yeeri kara maamulaha ama codsi ka yimaada sedex meelood meel barayaasha sare.

**Qod. 31**

Maamulaha Dugsiga waxaa muddo xileed labo sano ah iska dhex doorta Golaha barayaasha sare xubnahooda, kana soo dhex xula qofka u qalma waxbaridda dibna waa loo dooran karaa. Waxa uu mas'uul ka yahay korjoogteynta habsami u socodka howlaha Dugsiga.

Haddii ay dhacdo maqnaansho ama carqalad, maamulaha waxaa lagu beddelaa bare sare oo kale oo uu u wakiishay.

**Qod. 32**

Imtixaanka ayaa la qabtaa laba kal-fadhi sannad kasta, dhammaan maadooyinka la barto, kan ugu horreeya isla marka la dhammaystiro casharrada, kan labaadna waa celis dhammaadka muddada fasaxa sannadeedka.

Imtixaannada ayaa ka kooban:

a) sedex tijaabo oo qoraal ah, mid ku saabsan mowduuca kooxda sharciga,iyo mid ku saabsan mowduuca kooxda dhaqaalaha siyaasadda, xisaabaatka, xisaabinta iyo tirakoobka, iyo mowduuc ku saabsan maado kale oo ay doorteen Golaha barayaasha sare.
b) hal imtixaan afka ah maadda kasta oo la dhigo;

Imtixaannada waxaa qiimeeya guddiyo uu magacaabo Madaxa Dugsiga. Guddi kastaa waxa uu leedahay toban dhibcood oo lagu qiimeeyo imtixaanka arday kasta. qiimeynta lagu bixiyo imtixaannada qoraalka ah waxay celcelis la sameeyaan dhibcaha lagu bixiyo imtixaannada afka oo loo eego isla maaddada. Ugu yaraan lix dhibcood min -toban ayaa looga baahan yahay si ardaygu u gudbo maaddadiba.

Ardayda aan ku gudbin imtixaanka waxaa loo oggol yahay inay diyaariaan imtixaanka ku celiska ayna galaan imtixaanka kalfadhiga labaad ee ku celiska waxi aan ka badneyn afar maado ee la qatay. Ardayda aan ku guuleysan imtixaanka in ka badan afar maado ayaa loo oggolaadaa inay ku celiyaan sannad dugsiyeedka ay ka yimaadeen hal jeer oo keliya.

Ardayda leh maqnaansho in ka badan seddex meelood meel casharrada hal maaddo ama ka badan looma ogolaanayo maaddooyinkaas in ay galaan imtixaanka kalfadhiga hore, laakiin waxa kaliya ee loo ogolaan karaa kan keliya ee ku celiska.

**Qod. 33**

Dugsiga wuxuu bixiyaa diblooma. Si loo helo diblooma, arday kastaa waa inuu ku gudbaa dhamaadka imtixaanka dibloomada sannadka saddexaad ee Dugsiga. Imtixaankaas wuxuu ka koobanyahay imtixaan afka ah dhammaan maaddooyinka lagu dhigo dugsiga kuna difaaco gudiga imtixaanka hortooda oo ka kooban dhammaan barayaasha sare. Imtixaanka shahaadada Diblooma waxaa lagu xukumaa qiimeyn guud oo kulliyadeed dhammaan barayaasha sare, iyadoo la tixgalinayo natiijooyinka uu helo arday kasto inta lagu gudajiro waxbarashada iyo qiimeynta oo lagu muujiyey cadeynta ku haboonaanshaha ama ku habboonaasho l’aanta.

Ardayda aan helin ku habboonaanta waxay xaq u leeyihiin inay ku celiyaan imtixaanka Diblooma ee fadhiga imtixaanka dhaca dhamaadka fasax sannadeedka. Ardayda aan u qalmin ku habboonaanta kalfadhiga imtixaanka celiska casharka ku celinta waa loo ogolaadaa.